



SOMALI A1 – STANDARD LEVEL – PAPER 1
SOMALI A1 – NIVEAU MOYEN – ÉPREUVE 1
SOMALÍ A1 – NIVEL MEDIO – PRUEBA 1

Monday 14 May 2007 (morning)
Lundi 14 mai 2007 (matin)
Lunes 14 de mayo de 2007 (mañana)

1 hour 30 minutes / 1 heure 30 minutes / 1 hora 30 minutos

INSTRUCTIONS TO CANDIDATES

- Do not open this examination paper until instructed to do so.
- Write a commentary on one passage only. It is not compulsory for you to respond directly to the guiding questions provided. However, you may use them if you wish.

INSTRUCTIONS DESTINÉES AUX CANDIDATS

- N'ouvrez pas cette épreuve avant d'y être autorisé(e).
- Rédigez un commentaire sur un seul des passages. Le commentaire ne doit pas nécessairement répondre aux questions d'orientation fournies. Vous pouvez toutefois les utiliser si vous le désirez.

INSTRUCCIONES PARA LOS ALUMNOS

- No abra esta prueba hasta que se lo autoricen.
- Escriba un comentario sobre un solo fragmento. No es obligatorio responder directamente a las preguntas que se ofrecen a modo de guía. Sin embargo, puede usarlas si lo desea.

Faallo ka qor **mid ka mid ah** qoraallada soo socda:

1. (a)

(Qaybtan ee sheekadii waxay ku saabsantahay nin Calimaax la yidhaahdo oo helay warqad ay dirtay gabadhii uu jeclaaday oo Cawrale loo yaqaanno.)

Haddaba, maalintay tageen Taleex maalintii ku xigtey markay abbaara tobankii aroornimo ahayd oo ay jimce tahay ayaa ninkii warqadda sidey raadiyey Calimaax. Wuxuu doondoonaaba wuxuu ka helay isagoo madan lagu shiraayo dhex fadhiya oo shirka wax kaga jira. Shirwac wax kale ma yeeline shirkii buu dhex maaxay ilaa uu Calimaax warqaddii farta ka saaray sidii ballankii ay Cawrala isku ogaayeen ahaa.

Darxumo, waxay ahayd Calimaax sida wax loo akhriyo ama loo qoro midna ma aqoon, haddaba waxaa jirtey warqaddii inuu u dhiibey si uu ugu akhriyo ninkii barbarkiisa midig fadhiyey, oo nasiib darri ahaa sodoggiisii cusbaa oo uu mudda yar horteed gabarta ka guursadey, lana oran jiray Sugulle.

Waxaa dhacday markuu soddoggiis warqaddii jeexay oo weertii u horraysey oo ahayd “Calimaax sidii johoradeed yaanan kuu jamane” isha mariyey, mar labaadkiina ilaa ereyadii u danbeeyey oo ahaa Cawrala Barre akhriyey, oy u muuqatay inay warqaddu ku saabsan tahay jacayl ka dhexeeya Calimaax iyo ruuxaas dumarka ah, ayaa hoosiis dhex maray warqaddii iyo indhihiisii oo uu mar saddexaadkii naxdin iyo yaxyax daraadood dib eray uga kicin waayey. Halkaasuu isagoo dhididsan soddoggiis dib ugu celiyey warqaddii Calimaax iyadoo isku guda jirta. Calimaax waxay la noqotay in odaygii soddoggiisa ahaa indha dareeyey oo uu sidaas aawadeed warqaddii u akhriyi kari waayey. Markaasuu intuu warqaddii ka qabtay soddoggiis u dhiibay ninkii dhinaciisa bidix fadhiyey, oo ayaandarro labaad ahaa seeddigii Wacays.

Wacays warqaddii buu intuu galka ka saaray oo kala bixiyey beeg isu hor qabtay, isagoo xoogaa dareeni galay markuu aabbihii wejigiisa eegay dhididka saarsaaran. Sidii si le’eg Wacays bilawgiiba wuxuu la kulmay wax aanu filayn oo aad uga yaabiyey, waana ka bogtay warqaddii isagoo aan weli eray ugu sheegin Calimaax. Calimaax baa haddaba dareemay inay warqadda wax walaac geliyey soddoggiis iyo seeddiggiis ku qoran yihiin oo lagula dhici waayey ama lagala xishooday in loo sheego. Markaasuu ku yiri, “Wacays ii sheeg waxa warqadda ku qoran, yaase soo diray?” Wacays baa markaas u jawaaboo ku yiri, Calimaax waxa warqadda ku yaal iyo cidda soo dirtay midna halkan kuugu sheegi maayo, waayo Soomaalidu waxay ku maahmaahdaa, shir looma wada uunsiyo, ee waa inoo markaynno shirka ka dareerno.

Calimaax waa af gartay Wacays oo shirkii buu iska dhegeystey isagoo walaacsan oo ka fekeraaya waxa warqadda ku qoran. Nasiib wanaag, in yar dabadeed ayaa shirkii ninkii guddoonshaha ka ahaa xiray oo gartii dhammeeyey.

Sidii ballanku ahaa markii la dareeray ayaa Calimaax iyo Wacays is raaceen, oo haddii in yar la wada socdey Calimaax yiri, “Wacays ina keen guriga aad warqadda iigu akhridide”. Wacays baa markaas ku jawaabay, “Caliyow tanu mid gurigaagan laguugu akhriyaayo ma’ah ee cidladaas inoo leexi”. Cidladay u leexdeen ayaa Wacays warqaddii u akhriyey Calimaax.

Calimaax markuu tixdii u horraysey ee warqadda ku tiillay maqlay ayuu afka gacanta saaray oo hareerihisii deydeyey in cid kale dhegeysanayso. Hadduu amminkiiba gartay in waxa meesha ku yaal uu jacayl yahay asaanay ku habboonayn in seeddiggiis u akhriyo, ayuu yiri, “Bes! Wacaysow waa kaa dhantahay”.

Aqoondarro waa u Nacab Jacayl, Faarax M. J. Cawl, Muqdisho (1974)

- U firso siduu qoraagu u adeegsaday afka iyo qeexidda suugaaneed isagoo muujinaya xaaladda Calimaax uu ku jiray.
- Ka faallood kaalinta iyo qaayaha tilmaamidda wixii dhacay ee qaybtani.
- U firso dareemada ay kicin karayso qaybtani iyo sida qoraagu u qeexay qaabeynba luqadda.

1. (b)

Madax Goodir

Mar aan gaban ahaa beri
 galab aan adoogay
 geed uu fadhiyi jirey
 sheeko kooban kaga guray,
 5 wuxuu yidhi: “guyaal hore
 boqor geesalaa jirey
 oo goostay weligii
 inaan iinta lagu garan.
 Fule waa geddiisoo
 10 wuxuu goorba hubiyoo
 gedfo oo cimaamado,
 nin gaaraa sirtii helay
 godob buuse taransaday
 garashadu u sabab tahay
 15 qof gafaana laga dhigay,
 hadduu gaabsan waayana
 inuu gowrac jiro maqal.
 Hadba giirka loo kici
 goldalooladuu helay
 20 inay gudubto loo diid.
 Isna waa gartiisee
 liqi waa gasiinkii
 war guntamay la foolqaad
 hadba gaadhka meel dhigay
 25 dadka uurka googo’ay
 isna garay ka wada qari,
 kuna oloshey gogoshii.”
 “Goobyalka layliga
 kolkay gama’ is waayeen
 30 gelin dhexe rugtiisiyo
 gurigii ka soo bood,
 gudcur beegsey duurkiyo
 gelliyada dugaagga leh
 mugdigii galaydhkiyo
 35 garanuugta kala didi,
 gocoshiyo xasuus iyo
 kalgacayl sabooleed
 gaashaan ka sii dhigay.”

40 “Wuxuu gebidhacleeyaba
 kolkii waagu galac yidhi
 geed hoostii faadhfaadh
 sidii bahal god dheer qoday,
 dabadeed gafuurkiyo
 gadhka ciidda saaryoo
 45 la faq goofkii keligii
 dulucdiina gaadhsii,
 ‘inuu boqorka Goojaa
 madax goodir leeyahay’.”

50 “Hadda iga ma goyside
 waxaad iga guraysaa,
 sheeko beri la ii galay.
 Geeskii warkiisii
 kii cabudhay kolkii ganay
 garbihiisa laga duul
 55 gebigii fudayd noqoy
 goobtiina aasyoo
 ka hurgufay go’iisii
 galbay oo ka sii socoy.”

60 “Ka gadaalna meeshii
 laye ‘goortii roob helay,
 geesaa ka soo baxay.’”

Maxamed Xaashi Dhamac ‘Gaarriye’

- U firso siduu gabayaagu habeeyay farriinta maansadan.
- Sidee buu gabayaagu afka ugu isticmaalay si uu u tuso dareemada ninka ogaaday xogta boqorka inuu leeyahay madax goodir?
- Maxaad ka sheegi kartaa codka iyo habeynta erayada iyo kaalinta ay ku leeyihiin muujinta heesta dulucdeeda?